# HOOKAH

**waa tuubo biyood oo loo isticmaalo in lagu cabo qiiqa tubaakada dhadhanka leh, sidoo kale loo yaqaan shiishada, iyada oo loo marinayo biyo la qaboojiyey.**

**Hal saac** oo ah kalfadhiga hookaha wuxuu ka kooban yahay **36 jeer** qiiq ka badan sigaarka.

**Dhadhanka** tubaakada Hookah **waxay soo jiidataa** dhalinyarada iyo dadka waaweyn.

Shiishada waa tubaako dhegdheg ah, oo inta badan lagu qooyay malab ama molasses. Shiishada dhirtu waxay noqon kartaa **sun** la mid ah tan shiishada tubaakada.

Hookah waxaa qaab elektaroonik ah loogu cabi karaa **qalimaanta hookah** ama **e-hookah**, mana la garanayo saameynta y ku leedahay acaafimaadka.

Qiiqa Hookah wuxuu kordhiyaa **halista cudurro** ay ka mid yihiin kansarka, halbowlayaasha oo xirma, cudurrada wadnaha, cudurrada sambabada iyo dhibaatooyin dhaca xilliga uurka.

Wadaagista qaybta afka la gashto ee hookah waxay kordhisaa halista faafinta **cudurrada lakala qaado** sida qaaxada, cagaarshowga, herpes, iyo hargabka.

**Hookah MAAHA MID AMAAN AH OO LAGU BEDDELAN KARO sigaarada.**

MAINE QUITLINK.COM 1-800-QUIT-NOW

Department of Health and Human Services

**Wax badan ka ogoow oo taageero ka hel barta MaineQuitLink.com**

Somali